


www.somalilandbiodiversity.org I August, 2022 I Tirsiga 9-aad

## Tusmada Warsidaha

Tifaftiraha..........................................1
Ka faa'idaysiga Jaamacadda............2
Waxbarashada Toolmoon.................3
Baahida Shaybaadh Aasaasi ah.........4
Saamaynta Roobka ee Dhirta...........6
Geedka Garanwaaga................7
U-dabbaaldeggii Soomaalilaan.........8
Wararka Xarunta...............................9

**Noolaha Qormadan**

Zaqiqah mucronate

(Dungaari, Afruug, Gugaangub)



Zaqiqah mucronata, (Dungaari, Afruug or Gugangub), waa bahda doogga oo ka baxa carrooyinka cusbadu ku badan tahay ee dhanka xeebaha, Gacanka cadmeed iyo badda cas, labadaba.

**Eeg Bogga 5aad**

Gugii dhawaa waxa aan cashar ka bixiyey fasalka AGRI223 ee koorsada abla'ablaynta dhirta. Qayb ka mid ah casharka waxa la rabay in ardaydu darsaan noocyada bahda doogga iyaga oo adeegsanaya weynayso (hand lenses). Fasalku wuxu ka koobnaa 35 arday. Intii aanu bilaabmin qolka waxa yaallay 10 miis oo yaryar iyo 10 kursi oo ah nooca loogu talo galay in wax lagu dulqoro, laakiin aan dhirta lagaga dul shaqayn karin, sidaa darteed kuraas dheeraad ah ayey ardaydu ka soo qaadeen fasallo kale. Taasi waxay nagu dhalisay in aanu ka fikirno sidii loo casriyeyn lahaa jaamacadda qaybta agabka laabka, arrintaa waxa ka dhashay kulan aanu la yeelannay xubno ka mid ah maamulka jaamacadda.

Kulankaas waxa diiradda lagu saaray baahida loo qabo in la helo agabka waxbarashada laabka, muhiimaddaas awgeed waxa aan ballanqaaday in xaruntu isku hawli doonto in la helo agab buuxiya doorka waxbarashada dhirta, dhanka kalena maamulku waxa ay ballanqaadeen in ay diyaarin doonaan qolkii la dhigi lahaa iyo in ay xarunta kala shaqeeyaan sidii loo heli lahaa goob ka ballaadhan ta ay haatan ku hawl galaan.

Waxa aan Faysal iyo Sulub uga mahadnaqayaa diyaarinta kulankaas. Waxa kale oo gacantayda soo galay qorshe hawleedka jaamacadda ee 2019-2024. Qorshaha waxa laga dhex heli karaa fursado ay xarunta iyo jaamacaddu ka wada shaqayn karaan. Xubnaha jaamacadda qaarkood hore si gaar gaar ah kulanno waanu u wada yeelannay laakiin kulan wadareedkani wuxu ahaa fursad kale oo lagu sii horumarin karo hawlaha, waxana ka dhashay in la isla gartay in C.Risaaq Daahir, hormoodka kulliyadda Beeruhu uu noqdo isku-xidhaha xarunta iyo jaamacadda.

Xubnaha kulanka joogay: Mary Barkworth, ka socotay Somaliland Biodiversity Foundation;

**Eeg Bogga 5aad**

# Ka Faa'idaysiga Dhulka Jaamacadda

Dhulka jaamacadda waxa looga faa'idaysan karaa waxbarashada, cilmi baadhista, iyo xidhiidhka dadweynaha. Xaruntu waxa ay jaamacadda kala shaqaynaysay sidii loo kordhin lahaa qaayaha jaamacadda ee dhanka 1) kordhinta tirada noocyada dhireed ee jaamacadda; 2) Rakibista qalab lagu la soconayo deegaanka jaamacadda; 3) is-dhex gelinta agabkaas iyo waxbarashada jaamacadda; iyo 4) Muujinta sida horumarkaasi uu ula jaanqaadayo higsiga jaamacadda.

**Dhirta Xerudhaladka ah ee muhiimka ah**: Tallaabo asaasi ah oo lagu baran karo dhirtu waa in aad ku baraarugsanaato dhirta innagu hareeraysani in ay yihiin xarudhalad iyo in ay dool yihiin. Qofku wuu baran karaa magacyada dhirta laakiin kuurgalka ayaa muhiim ah waana aqoonta dhabta ah.




*Flaveria trinervia* ama magac soomaaligiisa Haramashle, waa harame ka baxa meelaha cagtu ku badan tahay iyo carrada la rogay. Soomaalilaan waa laga helaa. Waxa lagu gartaa qaabka uu u baxo iyo 3-da aroore ee caleenta oo aad u muuqda. Lingaxan wuxu kugu xidhiidhinayaa bogga Openherbarium oo macluumaad dheeraad ah laga helayo

SBF waxa ay ka hawlgalaysaa sidii loo kordhin lahaa tirada noocyada dhirta jaamacadda oo ay ku jiraan kuwa doolka ah ee loo beero cunto ahaan ama dawo ahaan iyo sidoo kale noocyada haramaha ah.

Waxa kale oo la bilaabi doonaa kayd-xogeed si loo diiwaangeliyo goorta iyo goobta noocyada dhirtu ay ku kala sugan yihiin iyo diiwaanka heerka korniinkooda. Diiwaankaasi waxa uu fududayn doonaa in ay ardaydu wax badan ka fahanto dhirta.

**La socodka Deegaanka**. Farsamada casriga ah ayaa oggolanaaysa la socodka faahfaahsan ee isbeddelka deegaanka.




Qalabka qoyaanka carrada (bidix) korriinka geedka (midig).

Waxa ay 15-kii ilbidhiqsiba kaydinayaan xog illaa dhawr sanno.

**CabdiXakiim Cabdi** ayaa jaamacadda ka hirgelin doona laba nooc oo ah qalabka lagu cabbiro deegaanka, mid carrada ah oo sidoo kale heerkulka hawada cabbiraya oo 15 cm ka sarreeya dhulka iyo qalab lagu cabbiro korniinka geedka iyo isbeddel kasta oo ku yimaadda oo ka yar 1mm (fiiri maqaalka hore)

Marka uu dhammeeyo hawshaasna, **C.Xakiim** waxa uu bixin doonaa tababar la xidhiidha sida xogtaas koombuyuurka loogu shubo iyo sida loo isticmaalo. Ardayda tababarka waxa lagu dhiirrigelin doonaa in ay sameeyaan mashruuc kooban oo hawshaas ku saabsan, tababarka ka dib. Taasi waxa ay ka caawin doontaa in ay si fiican u fahmaan sida la iskugu xidho hawlaha badan ee la xidhiidha deegaanka waxana ay waayoaragnimo ka siin doontaa sidii ay u samayn lahaayeen daraasado iyo warbixinno.

**Isku-xidhka Waxbarashada:** Kulliyadda iyo ardaydaba waxa lagu dhiirrigelin doonaa in ay isku xidhaan ka faa'idaysiga khayraadka jaamacadda iyo manhajka, tusaale ahaan, in korniinka geedka lala xidhiidhiyo qoyaanka carrada iyo/ama heerkulka; in la qeexo goorta cayayaanka duula ay ugu badan yihiin soo booqasahda ubaxa;

**Eeg Bogga 5aad**

# Waxbarashada Toolmoon

Barashada firfircoon waxa laga wadaa qaab dhigista ardayga siinaysa shaqo gacmeed, khilaaf-xallin, jawaabo raadin, go'aanno gaadhis, xal raadin iyo in ay fikirrada u sharraxaan qaab maskaxdooda ka imanaysa. Si koox ah iyo si keli ah way u shaqayn karaan, iyaga oo ka jawaabaya su'aalaha la hor dhigo casharka dhexdiisa iyo horraantiisaba, ama iyaga oo laftoodu weydiimaha ka dhex abuuraya casharka dhexdiisa.

Daraasadaha Maraykanka ayaa si joogto ah u muujinaya in waxdhigista toolmoon ay kor u qaaddo natiijooyinka imtixaannada gaar ahaan ardayda ay hore u hooseysay heerkooda aqooneed. Iyada oo ay jirto tilmaamo xoojinaya in waxdhigista toolmoon ay ka wax-ku-oolsan tahay cashar jeedinta qallalan haddana weli tirokoobyadu waxay tilmaamayaan in weli hirgelinta qaabku aad u hooseyso gaar ahaan fasallada ardaydu badan yihiin. Sabab?

**Scott Freeman**, oo aad ugu dooda waxdhigista toolmoon ayaa soo jeediyey dhawr sababood oo mid ka mid ahi tahay in aan nidaamkani fududayn oo uu macallinka uga baahan yahay diyaargaraw noocii hore ka duwan, ardayga qudhiisa aanay u fududayn oo looga baahanayo qaab cusub oo ka duwan kii uu wax ku soo bartay, kuwa qiimaynaya laftoodana aanay u fududayn.

Isaga iyo xertiisu waxa ay sidoo kale ogaadeen in haddii nidaamkan marmar la isticmaalo aanu natiijo fiican keenayn laakiin haddii la joogteeyo ay natiijadu fiicnaanayso. Markii sababta la weydiiyey wuxu soo xigtay aragtida "maskaxda iyo qalbiga". Qaybta maskaxdu waxay u baahan tahay fursadda uu ardaygu ku isticmaalayo wixii uu bartay. Marka uu macallinku wax su'aalayo isaga oo aan jawaab siinayn maskaxda ayey rogrogayaan. Qaybta "Qalbigu" waxa ay la xidhiidhaa abuurista dhaqan ardaynimo oo ay ardaydu ka doodayaan fikirro oo ay dhexdooda falanqaynayaan falcelinna kala helayaan macallinkana ka helayaan.

Si aad mawduuca wax badan uga sii ogaato daalaco waraysiga laga qaaday Scott Freeman. Waxa kale oo aad eegtaa qaabka hab dhigistan loogu dabbaqayo fasalka, oo aad ka heleyso jaamacadda Cornell University oo websitekeeda xog badan laga helayo website with lots of suggestions.

*Sidee u qiimayn karaa casharkii aan bixiyey?*

Aad buu u hooseeyey! Waqti badan waxan ku bixiyey diyaarinta casharkii aan akhriyi lahaa, oo aanay waxba kaga jirin wax ardayga ku dhiirrigelinaya in uu la falgalo casharka. Sida fiican ee aan yeeli lahaa waa side?

- Casharka ayaan sii diyaarin lahaa oo ka dhigi lahaa mid la heli karo fasalka ka hor. Taasi ardayga waxay siin lahayd waqti ay ku sii arkaan oo ay weydiimaha ku sii sameeyaan. Waxa kale oo ay kobcin lahayd awooddooda luqadda ingiriisida.
- Casharka iyo weydiimaha waanu is dhex wadi lahayn. Weydiimaha qaar waxay ahaan lahaayeen kuwo toos ah kuwa kalena waxay abuuri lahaayeen jawi falanqeyneed.
- Waxanu diyaarin lahayn tilmaamo keenaya in ardaygu dabbaqo xogta casharka la baranayo. **Eeg Bogga 5aad**

## Sannadka Soo Socda





Usbuuc ka hor fasalka waa in casharka la dhigo barta Youtube-ka si ardaydu u sii arkaan isla markaana uga sii diyaariyaan wixii su'aalo ah ee casharka ka dhasha.

Fiiro gaar ah: Tusaale ahaan casharka la xidhiidha 'Doogga' waa in ardaydu awood u sii yeelataa in ay:

- Adeegsan karaan ereybixinaha la xidhiidha qaabka iyo dhismaha xubnaha 'Doogga';
- Isticmaali karaan bikaacooyinka (weynaysada);
- Isticmaali karaan habka jid-furaha ah ee aqoonsiga geedka.

# Baahida Shaybaadh Waxbarasho oo Aasaasi ah



Fasalka abla'ablaynta dhirta, 15 daqiiqo ka hor intii aan casharku bilaabmin.

Fasallada sayniska waxa looga baahan yahay in ay ardayga siiyaan tijaabooyin mawduuca la xidhiidha iyo diyaarinta warbixinno saynis ah. Waxa la isku dhex dhafi karaa xiisado 'shaybaadhka' ah iyo kuwa kale ee casharrada fasalka ah iyada oo manhajka la raacayo.

Xilligan aad uma badnaan karaan fasallada shaybaadhku maadaama uu weli cusub yahay shaybaadhka jaamacaddu oo uu qalab badan oo cusubna u baahan yahay, laakiin waxa laga sii fikiri karaa qalabka lagu soo kordhin karo kuwa haatan jira?

Jawaabtu waxa ay ku xidhnaanaysaa hadba maaddada la dhiganayo. Shaybaadhka kimisterigu wuxu u baahan yahay qalab kimikada la xidhiidha iyo meelihii kimikadaas lagu ilaalin lahaa. Shaybaadhka abla'ablaynta dhirtu kaa wuu ka qalab kooban yahay oo wuxu u baahan yahay miisas iyo kuraas lagu dul shaqeeyo iyo qalab aasaasi ah sida bikaacooyinka aragga (lenses), mastarado (rulers) iwm. Sidoo kale miisasku waa in ay yeeshaan xadhkaha korontada iyo kuwa internedka si loogu dul isticmaali karo maykaraskoobka iyo koombuyuutarrada mararka loo baahdo. Waxa kale oo looga baahan yahay khaanado lagu ilaalin karo agabka shaybaadhka.

Jaamacaddu waxa ay diyaarisay qol loo isticmaali karo shaybaadhkaas laakiin weli u baahan in agabkii kuraasta iyo miisaska shaybaadhka ee ku habboonnaa lagu qalabeeyo. Ururka SBF ayaa haatan keenay qalab waxtar u leh casharrada shaybaadhka ee koorsada abla'ablaynta dhirta.



Fasalka kaddib markii ay soo xaadireen 35 arday (laba ka mid ah saddexdii kooxood ayaa muuqda).

Xagaaganna ururku wuxu rajaynayaa in uu shaybaadhka ku qalabeeyo miisaska iyo kuraasta ku habboon.

Kuraas ku habboon in la helaa way fududdahay laakiin miisaska ayaa u baahan in si gaar ah loo dalbado. Nasiib wanaag dalka waa laga helayaa shirkad dalabkaas samayn karta oo diyaarin karta miisas leh meelihii ay ku xidhmi lahaayeen agabka korontada iyo internedka, isla markaana iska xejin kara kimikooyinka.

Haddii dibadda dalka laga dalban lahaa qiimaha raritaanka ayaa badanaya waxana la sugayaa waqti dheer. In gudaha dalka laga dalbado ayaa fiican taas oo hoos u dhigaysa qiimaha uu ku kacayo isla markaana dhaqaalaha dalka u fiican.

WAXAD KA CAAWIN KARTAA Soomaalilaan sidii ay u heli lahayd waxbarasho tayo leh adiga oo ka qayb gelaya dedaalka kaalmo ee ururka.

Sawirka 1: Dhanka sare: Fasalka abla'ablaynta dhirta, 15 daqiiqo ka hor intii aan casharku bilaabmin.

Sawirka 2: Fasalka kaddib markii ay soo xaadireen 35 arday (laba ka mid ah saddexdii kooxood ayaa muuqda). Koox walba waxa la hor dhigay hal maykroskoob, iyo xidhmo qalabkii la socday ah.

## Fadlan Caawi

# Waxbarashada ………

**Ka yimid bogga 3aad**

- Waxa loo baahnaa casharka ka dib in ay sameeyaan xaashi ay ku qoran tahay xogta geedka ay muunad ahaanta u barteen.
- Koox walba waxa laga codsan lahaa in nooca geed ee ay darseen ay barbardhigaan geedka kooxda kale daraasadaysay.
- Ta ugu sii muhiimsan, Waxan diyaargarawgayga ku dari lahaa waxdhigashada toolmoon.

**Ka yimid bogga 1aad**

**Xubnaha Jaamacadda:** Maxamed Cali Xirsi, Guddoomiye ku xigeenka jaamacadda, qaybta maamul-ka iyo Horumarinta; Maxamed Sulub, Agaasimaha qaybta xidhiidhka; C. Fataax Maxamuud Cabdi, Hor-moodka kulliyadda Sayniska; C.Risaaq Daahir, Hor-moodka Kulliyadda Beeraha iyo caafimaadka xoolaha; Axmed Muuse, madaxa qaybta laabka.

*Mary Barkworth*

## Noolaha Qormadan……

**Ka yimid bogga 1aad**



Quruxda geedkan waxa ay ka timaaddaa dhanka samayskiisa ee ma aha dhanka midabka, oo wuxu leeyahay xaglo kooban oo xooggan iyo caleemo afaysan iyo sidoo kale qayb ubax ah oo cad.

Qaybta cad waa qaybta lab ee ubaxa iyo qaybta kore ee daboolka ubaxa.

# Ka Faa'idaysiga…..

**Ka yimid bogga 2aad**

in la is barbardhigo kala geddisnaanta cayayaanka ee meelo kala duwan oo jaamacadda ah; mashaariicda noocaas ah ee ardayda lagu hawlgeliyaa waxa ay keeni karaan in ay qoraan diiwaanno iyo in ay shiilaan xogta deetana diyaariyaan warbixinno qoraal ah oo daraasaddahaas ku saabsan. Taasi waxa ay kor u qaadi kartaa heerkooda waxbarasho waxana ay siin doontaa ardayda agab xirfaddooda kobcinaya.

**Ku Shaqaynta Higsiga Jaamacadda**: Hawlahaas oo dhami waxa ay ugu horreyn ka duulayaan higsiga jaamacadda ee ah "kor-u-qaadista tayada wax-dhigashada iyo waxbarashada jaamacadda". Ardayda iyo kulliyaddaba waxa lagu martiqaadi doonaa in ay qoraan maqaallo iyo warbixinno la xidhiidha isticmaalka agabkaas jaamacadda iyo sidii ay talo ugu darsan lahaayeen qaabka horumarinta isticmaalka agabkaas si loogu sii dhawaado higsiga jaamacadda ee ah: kor-u-qaadista hal-abuurka cilmibaadhiseed iyo ku-hawlgelinta bulshada.



*Mary Barkworth*

# Saamaynta Roobka Ee Dhirta





Sawir dhulka ah (bidix) iyo sawir cirka ah (midig), dhulka *Galoolka iyo Xagarka* ee Hawdka, Koonfurta Soomaalilaan.

Helitaanka biyuhu waxay saameeyaan korriinka geedka, laakiin waxa adag sida loo qeexo heerka, muddada iyo saamaynta xilli-roobaadyada kala duwan ee goobaha oomanaha ah, gaar ahaan marka aan la hayn agab macluumaadkaas lagu kaydiyo. Sannadkan horraantiisii, waxan booqday badhtamaha Soomaalilaan si aan u ogaanno meelaha macquulka ah ee lagu rakibi karo qalab tijaabo ahaan loogu ogaan karo macluumaad arrimahaa la xidhiidha. Waxa la isku dari doonaa xogta kala duwan ee qalabkaasi kaydiyo ee la xidhiidha qoyaanka carrada, heerkulka carrada, heerkulka hawada iyo korriinka geedka oo lagu daray xogaha geedaha ee laga soo qaaday dayax-gacmeedka Copernicus Sentinel-2, halkaas oo laga qiyaasi karo saamaynta heerka biyhu ku leeyihiin korriinka geedka sannadkii oo dhan.

Intii aan safarkaas ku jirnay waxa aanu gaadhnay afar ka mid ah shantii meelood ee aanu qorshaynay. Waxanu ku kala doorannay kala geddisnaantooda dhanka joogga iyo roobabka. Si aanu u gaadhno waxanu soconnay 400 km oo inta badan jid-cadde la marayey in kasta oo aanu wadannay gaadhi fiican oo 4x4 ah. Waxanu tegi kari waynay goobtii 5-aad jidka oo dheeraa isla markaana aan fiicnayn awgeed. Nasiib wanaag, kooxdii ila shaqaynaysay ee wasaaradda deegaanka iyo isbeddelka cimilada ayaa ii soo jeediyey goob kale oo aan taa ku beddeli karo, oo inkasta oo ay deegaannada bariga ku taallo haddana aan ka fogayn laamida. Halkaas baan ku rakibi doonnaa qalabka marka aan Soomaalilaan ku noqdo.

Meelaha aanu qalabka ku xidhnay mid ka mid ah ayaa ah kaymaha geedka Dayibka, geedkaas oo dhawaanahan aad u dhimanaya. Inta badan dhimashadaas oo u badan dhanka galbeed ee kayntaas,




Goobaha daraasadda hordhaca ah

# Geedka Garanwaaga iyo Joogtaynta

Geedka garanwaagu waa geedka ugu fidista badan Soomaalilaan. Wuxu la wareegay dooxyadii, hareeraha waddooyinka iyo meelihii cagtu ku badnayd. Sawir laga qaaday dayax-gacmeedka ayaa tilmaamaya in imika 9% uu qariyey dhulka galbeedka Soomaalilaan. Meel kasta uu geedkani ka baxo wuxu barabixinayaa dhirtii xerudhaladka ahaa wuxuna hoos u dhigayaa kaydkii biyaha ee ceelasha. Qodxaantiisu waxa ay dhaawac gaadhsiiyaan cagta adhiga midhihiisuna waxay suus geliyaan ilkaha geela, riyaha iyo dameeraha, taas oo keenta in nafleydaasi macalluul u dhintaan, sidaa darteed la yaab ma leh marka ay reer miyigu geedka ugu yeedhayaan 'Geed-Jinni'. Ururro dhawr ah ayaa bulshada ku dhiirrigeliya in ay xakameeyaan geedkan oo u adeegsadaan dhuxul ahaan iyo in ay midhaha geedkan calaf xoolaha uga dhigaan, laakiin de-



Goobta lagu kala sooco Garanwaaga foornada ka hor



Guuleed iyo  Helen Pickering , moofada horteeda.

daalladaas wax saamayn oo muuqda illaa haatan ma leh. Galoolka ayaa weli dhuxusha laga shidaa garanwaaguna weli wuu fidayaa.

Guuleed Axmed wuxu qaaday jid kaa ka duwan. Wuxu aasaasay shirkad la yidhaa Lander Prosopis, oo dakhli ka samaysa geedkan garanwaaga oo dhuxul tayo leh ka soo saarta. Dakhligaas oo uu ku sii kobciyo shirkadda oo uu qalab cusub ugu soo iibiyo, shaqaale badan ku qorto dhul badan oo kalena ku sii gaadho. Qorshayaasha Guuleed intaas uu kuma ay istaagin ee wuxu sidoo kale la xidhay MedicineAfrica oo ay wada sameeyeen ReSeed, oo ah urur tabarruc ah oo ay sameeyeen J.A.C. Trust. Ujeeddooyinka ReSeed waxa ka mid ah in la sameeyo iskaashatooyin is-wada oo dhulkii garanwaaga laga nadiifiyey u beddeleya aag adkaysi u leh isbeddelka cimilada, aaggaas oo ka caaggan in uu garanwaagu ku soo noqdo, isla markaana la dhiirrigelinayo in la beero dhirta xerudhaladka ah iyo dalagyo cunto ahaan loo beeran karo.

ReSeed waxa ay tababarayaan dadka deegaanka si ay qayb uga noqdaan horumarinta bulshada iyada oo la daawadsiinayo tiifiiyo ku shaqaynaya tabarta

# U Dabbaaldeggii Soomaalilaan



Helen (midigta) iyo saaxiib kale oo calanka ku lebbisan.

Sannad kasta 18-ka May Soomaalilaan waxa ay u dabbaal degtaa madaxbannaanideeda. Si nasiib ah doorkan waxa ay ku soo beegantay aniga iyo Helen oo Soomaalilaan joogna. Qorshuhu wuxu ahaa in aanu maalintaa shaqo u baxno laakiin ma ay suuro-gelin oo ciidanka na raaci lahaa mashquul bay ahaayeen darawalkayaguna, Sacad, wuxu lahaa ubad rabay in ay bandhigga ka qayb galaan.

May 17, Sacad waxanu ka codsanay in uu suuqa na geeyo si aanu u soo daawanno diyaargarawga xafladda. Calamaanta ayaa meel walba sudhnaa, dukaammaduna waxay iibinayeen agab ay ku xardhan yihiin midabadda Soomaalilaan (Casaan, Caddaan iyo Cagaar); waxa muuqday jawi raynrayn ah oo munaasabadda la xidhiidha. Jawigaas baa na soo jiitay oo waxanu iibsannay dallaayado iyo agab kale oo calanku ku xardhan yahay.

Helen baa soo jeedisay in aanu ku lebisanno subaxn-imada, quraacda ka dib. Inta badan martida hudheelku waxa ay ahaayeen ajaanib sida annaga oo kale, iyo sidoo kale muwaaddiniin reer soo-maalilaan ah. Subaxnimadii markii aan quraacda u soo degey waan illawsanaa laakiin muwaaddin dhoollacadaynaya ayaa ii dhiibay maro saddexdii midab leh. Deetana waxa nagu soo biirtay Helen, in yar kadibna, waxa muuqatay in muwaddiniintu ay aad u xiisaynayaan ajaanibta kala qayb qaadanaysa munaasabadda dalka.

Mar danbe waxanu go'aansannay in aanu agagaarka dibadda hudheelka u baxno; waxa furnaa meherado inta badan dumar haystaan. Waxan arkayey Helen oo la dhaantaynaysa mid ka mid ah haweenkii dukaamada haystay oo labadooduba ay aad u dhoollacadaynayaan. Socodkii baanu sii wadannay annaga oo kolba u gacan haadinayna oo salaamayna dadkii aanu jidka isku weydaaranaynay.



Xasuusaha maalintaas

# Wararka Xarunta

**Koboca Xarunta Kala-duwanaanshaha Noolaha**

**Muunadaha:** Bilawgii Ogos, 2022, xaruntu waxay yeelatay 693 muunadood oo 465 ka mid ah la aqoonsaday noocyadooda. Korodhka badankiisu wuxu ka yimid hawl-qabad uu hoggaaminayey khabiir Dr Sebsebe Demissew oo ka yimid Xarunta Dhiroonka Itoobiya. Kuwo kalena waxa soo ururiyey Axmed I Cawaale iyo Faysal Jaamac, oo waxay ka yimaaddeen cilmibaadhis Axmed hoggaaminayey oo la xidhiidha isticmaalka qayb ka mid ah geedaha ee dawo-dhaqameedka.

Waxa kale oo aanu degelka OpenZooMuseum ku kaydinnay 218 xogood oo la xidhiidha bahda ‘arachnid’-ka oo ay 2021-kii Soomaalilaan ka soo ururiyeen Dr Lorenzo Prendini oo ka tirsan Xarunta taariikhda dabiiciga ah ee Maraykanka (American Natural History Museum = AMNH) iyo Tharina Bird oo ka tirsan Xarunta DITSONG ee xogta dabiiciga ah ee Koonfur Afrika, (DITSONG National History Museum of South Africa), muunadahaas 46 keliya ayaa la aqoonsaday noocyada ay yihiin. Lorenzo wuxu xoogga saarayey dhanka dib-qalloocyada halka Tharina ay diiradda saaraysay noocyada Caarada. Muunadaha waxa la kala dhigay labadaa xarumood ee maraykanka Iyo Koonfur Afrika ku kala yaalla, mar kasta oo noocyadooda la aqoonsadana xogtooda degelka ayaanu ku daabici.




U socdaalaya Hargeysa



Agabka sawiridda muunadaha dhiroonka.

**Qalab:** Xarunta imika waxa lagu soo kordhiyey qalab sawiraya muunadaha dhiroonka iyo sidoo kale bikaaco horumarsan. Qalabka muunadaha dhirta lagu sawiri karaa wuxu sidoo kale sawiri karaa kuwa cayayaanka. Mid ka mid ah sababaha aanu qalabkan u soo kordhinnay waa in sawirrada dhirta lala wadaagi karo khubarada dalka dibaddiisa joogta si noocyada geedaha aqoonsigooda ay gacan uga geysan karaan.

Diyaargarawga dhanka tababarka la xidhiidha cayayaanka (Hoosta Eeg) waxa aanu soo kordhinnay qalabkii loo baahnaa si tababarkaasi u qabsoomo.

# Saamaynta Roobka...

**Ka yimid bogga 6aad**

Halka kuwa caadiga ahina u badan yihiin dhanka waqooyi ee kaynta. Xagaagan waxan rajaynayaa in aan qalab ku xidho labada dhanba. Waxan rabnaa in fasir loo helo sababta dhimashada dhirtaasi ugu badan tahay dhanka galbeed ee kaynta. Labada dhinac dhexdoodana waxa aad uga baxay geedka Xayramadka (Dodonaea viscosa var. angustifolia) oo ka baxa carrada furfuran. Qalabka halkaa lagu rakibaa wuxu xog ka bixin karaa sida qoyaanka iyo heerkulka goobtaasi uga duwan yahay labada qaybood ee kale. ***AbdulHakim Abdi***

https://hakimabdi.com/blog/somaliland-scoping-trip

# Geedka Garanwaaga.

**Ka yimid bogga 7aad**



Cadceedda si ay u helaan cajalado waxbarasho oo mararka qaarkood Soomaali loogu turjumay. Mararka qaarkoodna waxa la daawadsiinayaa cajalado madadaallo ah laakiin nuxur waxbarasho leh. LanderProsopis iyo ReSeed waa laba urur oo kala duwan laakiin ay midayso nuxurka ah in la aqoonsado hal-abuurka iskii-isku-wada ee leh tiirar bulsho kuwo dhaqaale iyo kuwo deegaan.

Ujeeddooyinka LanderProsopis waa kuwo toos ah, samaynta shirkad noocan oo kale ahina waxa ay u baahan tahay dhabar adayg, shaqaale iyo dhaqaale. Illaa imika dhaqaaluhu waxa uu ka soo galaa Welthungerhilfe, oo ah urur kaalmo oo Jarmal ah iyo sidoo kale jeebka Guuleed iyo qoyskiisa.

Imika waxa ay ku shaqeeyaan hal wershed-dhuxuleed oo dhuxusha ka soo baxdana la iibgeeyo. Tallaabada xigtana waxa ay qorsheynayaan in qalabka wershedda la ballaadhiyo si shirkaddu u gaadhi karto meelaha kale ee dalka ee aadka uga cabanaya geedka Garanwaaga.

# U Dabbaaldeggii.....

**Ka yimid bogga 8aad**

Waxanu filaynay in ay maalintu nagu dheeraan doonto, laakiin may noqon, ee waxa ay noqotay maalin booqashadaydii wax ku kordhisa.



Madadaallo fiican baanu helnay dadkii aanu is dhaafaynayna iyaga oo gacan haadinaya oo dhoollacadaynaya waxa ay noo muujinayeen sida ay ugu faraxsan yihiin in aanu dabbaaldegga kala qayb galno; ama sida ay Helen u dhigtay "waxa ay ku madadaallanayeen sida uu muuqaalkayagu ahaa".

# Wararka Xarunta....

**Ka yimid bogga 9aad**

**Tababarka Noocyada Cayayaanka:**

**Cayayaanka**: Dr Tharina Bird ayaa oggolaatay in loo qabto tababar dhanka cayayaanka ah arday wax ka barata jaamacadda Hargeysa, Noofember 2022. Tababarkan ardayda waxa la bari doonaa sida loo qabto, loo diiwaangeliyo, ee loo kala saaro noocyada cayayaanka. Waxanay noqon doontaa bilawgii xarunta kaydka cayayaanka. Tharina waxay wax ka dhigi jirtay jaamacadda Botoswaana, imikana waxay casharro ka bixisaa jaamacadda Pretoria iyada oo sidoo kale ka hawl gasha xarunta DITSONG waaxda cayayaanka. Waxa ay tababarro ka bixisaa Namibia iyo Botswana waxana ay socdaallo arrimahaa la xidhiidha ka samaysay dalal badan oo Afrika ka mid ah.